



## Grocery Employee Hazard Pay Ordinance Xaashida Xaqiiqada



Agoosto 3, 2022, Gollaha Magaalada waxay u coddeeyeen in la joojiyo bixinta mushaarka khatarta sida ku xusan Grocry Employee Hazard Pay (GEHP, Sharciga shaqaalaha ee khatarta cuntada). **Joojinta waxay dhaqan geli doontaa Sebteembar 2 deeda, 2022**, sida ku xusan sharciga GEHP, gaar kamid ah ganacsiyada raashinka ee magaalada Seattle waxaa laga doonayay inay bixiyaan \$4 halkii saac oo ayna siiyana shaqaalaha laga soo bilaabo Febraayo 3, 2021, illaa iyo Sebteembar 1, 2022. Laga bilaabo Sebteembar 2, 2022, waxaa lagu dhaqmi doonaa shuruudahaan soo socda:

- **Joojinta mushaarka khataraha:** sharciga mar dambe kama doonaayo in shirkada caymiska daboolay inay shaqaalaha halkii saacba siiyaan \$4.
- **Ogeysiiska xaquuqaha:** shirkada caymiska waa inay bixiyaan Ogeysiiska Xaquuqaha oo ah muddo hal sano ah oo soconaaya illaa Sebteembar 2, 2023.
- **Hirgelinta:** Shaqaalaha qaba cabashooyinka ah in shirkadoodu bixin waysay mushaarka khataraha inta u dhaxaysay Febraayo 3, 2021, iyo Sebteembar 1, 2022, waxay wali lasoo xariiri karaan Office of Labor Standards (OLS, Xafiiska Xeerarka Shaqaalaha) ayadoo diyaar la ah cabashadooda saddexda sano (illaa Semteembar 3, 2025). Fadlan haka daahin inaad lasoo xariirto xafiiska si aad u xaqiijiso inaad hesho xaquuqda sida ku xusan sharcigaan. Waxaad la xariiri kartaa OLS adoo ka wacaaya [\(206\) 256-5297](tel:2062565297) ama kala xariir oonleen adoo buuxinaaya foomkaan (guji halkaan).

### Shirkadehee ayay tahay inay u hogaansamaan sharcigaan?

Sharcigani wuxuu khuseeyaa Ganacsiyada Raashinka, oo ah dukaamada tafaariiqda kuwaas oo ah:

1. In kabadan 10,000 oo fiit oo laba jibbaaran cabir ahaan oo aasaasiyan ka shaqeeya cuntada faariiqda; ama
2. In kabadan 85,000 fiit oo laba jibbaaran, oo leh boqolkiiba 30 ama in ka badan oo ka mid ah aaggeda iibinta ka shaqeysa iibinta raashinka.

“Raashinka” waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn: wax soo saarka cusub, hilibka, digaagga, kalluunka, alaabada deli, badeecada caanaha laga sameeyo, cuntooyinka qasacadaysan iyo kuwa la qaboojiyey, cuntooyinka qalalan, cabbitaannada, cuntooyinka la dubay, iyo/ama cuntada la diyaariyey.

Si loo daboolo sharcigan, ganacsigu waa inuu ku shaqeeyaa in ka badan 500 shaqaale adduunka oo dhan ah. Sharcigu **ma** saameynayo dukaamada xaafadaha, ku yaal ama sandaqadaha cuntada oo aasaasiyan iibiyo qeyb xadidan oo alaab ah.

### Waa kuwee shaqaalaha raashinka ee u qalma mushaharka halista?

Sharcigaani waxa uu khuseeyaa shaqaalaha ka shaqeeya Ganacsi Cunto oo caymis ku jira oo ku yaal goob tafaariiqeed oo ah Seattle.

### Immisa waaye mushaharka halista?

Shaqaaluhu waa inay helaan ugu yaraan **\$4 saacaddii** oo ah mushaharka halista. Mushaharka Halista wuxuu siyaado ku yahay magdhow, gunooyin, komishan, iyo lacagaha kale ee uu xaq u leeyahay shaqaalaha raashinka ee lagu siiyo adeegyada uu bixiyo.

Ganacsiyada Raashiinka waa ka mamnuuc qaadista tillaabooyinka lagu dhimayo magdhowga kale ee shaqaalaha amarkan dartiis.

### Ganacsiga raashinka waa inuu:

- Bixiyaa mushaharka halista isla mar la bixinayo magdhowga wakhtiga ee caadiyan loo siiyo saacadaha ay shaqeeyaan;
- Si gooni ah u sheega ugu caddeeyaa mushaarka halista iyo magdhowga kale;
- Siyaa shaqaalihiiisa Notice of Employment Information (Ogeysiinta Warbixinta Shaqada), hadba sida uu rabo Wage Theft Ordinance (Sharciga Xatooyada Mushaarka); iyo
- Shaqaalaha siiyaa ogeysiis qoraal ah oo ku saabsan xuquuqda uu sharcigaan siinayo ugu dambayn Maarso 5, 2021, oo ay ku jiraan xuquuqda ah in laga xoreeyo aargoosiga. Ogeysiiskan waa in lagu bixiyaa Ingiriis iyo luqadaha aasaasiga ah ee shaqaalaha dukaanka.

## SEATTLE OFFICE OF LABOR STANDARDS

Hadafkeenu waa in la hormariyo heerarka shaqaalaha ayadoo la adeegsanaayo wada shaqayn waxtar ah oo lala yeesho bulshada iyo ganacsiyada, hormarinta xeer xoojin iyo hal abuur leh, ayadoo muhiimada la siinaayo sinaan bulsho iyo isir.

### ADEEGYADEENA

Baaritaanka cabashooyinka

Wacyagelinta shaqaalaha

Caawimaad farsamo oo loogu talagalay ganacsiga

Ilaha iyo gudbinada

Adeega fasiraada iyo turjumaada luuqada ayaa la heli karaa. Qaban qaabooyinka loogu talagalay dadka naafada ah. Adeegyadu waa bilaash.

### Macluumaad Dheeraad ah

Wac: (206) 256-5297

Iimayl: [laborstandards@seattle.gov](mailto:laborstandards@seattle.gov)

Booqo: [seattle.gov/laborstandards](http://seattle.gov/laborstandards)